

U-DIYAAR-GAROWGAAGA BAARITAANKA GUDA-KU-JIRKA KORE (EGD)

Loogu talagalay bedqabkaaga, **JOOJI** afka in aad ka qaadatid dareere iyo wax kale oo dhan 3 saacadood ka hor habraacaaga ama waa la baajin doonaa oo dib ayaa loo dhigi doonaa. Fadlan raac tilmaamaha faah-faahsan ee hoos ku qoran.

Baaji ama dib-u-dhigo ballantaada:

Haddii ay noqoto in aad baajiso ama dib-u-dhigato ballantaada, fadlan sida ugu dhaqsiyaha badan ee suuragalka u wac 612-871-1145.

Gaadiidka:

Waa in aad diyaarisatid qof weyn oo mas'uul ah oo kuu soo raacaya habraacaaga oo sii joogaya xarunteenna muddada uu socdo habraacaaga. Gaadiid taksi ah ikhtiyaar ma aha haddii uu ku raacayo qof weyn oo mas'uul ah mooyaane. Haddii aad ku guuldaraysato in aad diyaarsato gaadiid uu wado qof mas'uul ah oo kula joogi kara muddada uu habraacaaga socdo, habraacaaga waa la baajin doonaa oo dib ayaa loo dhigi doonaa.

Habeenka ka horreeya habraacaaga:

- Jooji in aad cunto cuntooyin adag oo bilow cuntada dareeraha ah ee cad marka ay saacadu tahay 11:45 fiidnomo(pm). Dareerayaasha cad waxaa ka mid ah waxyaabaha aad wax ka dhex arki karto.
 - Tusaalooyinka cuntada dareeraha cad waxaa ka mid ah: biyo, shaah (aan caano ama kareem toona lagu darin), maraq cad ama fuud, Gatorade, Pedialyte ama Powerade, cabitaannada soodhada ah iyo kuwa aan soodhada ahayn ee fudud (Sprite, 7-Up, Gingerale), cabitaannada miraha cufan ee aan ku jirin balaqa (tufaax, cannab cad, karamberr cad), Jell-O iyo jallaato-qori.
 - Kuwan soo socda lama oggolo in lagu daro cuntada dareeraha ee cad: dareerayaasha guduudan, cabbitaanka khamriga, kafeega, waxyaabaha caanaha laga sameeyo, borotiinka la ruxo, maraq kareem, casiirka leh qashirka iyo tubaakada la ruugo.

Maalinta habraacaaga:

Daawooyinka Subaxdii: Waxaad qaadan kartaa dhammaan daawooyinkaaga subaxdii oo ay ka mid yihiin daawooyinka dhiig karka, dhiig khafiifiyeyasha (haddii uusan xafiiskeenna ku amrin in aad kuwan joojiso), methadone, daawooyinka ka hortagga qalalka oo lala qaadanayo kabashooyin yaryar oo biyo ah 3 saacadood ka hor habraacaaga ama waqti ka hor ah. Haddii aad qabtid sonkorow ama cudurka sonkorta, la xiriir bixiyahaaga kula-socda si aad uga hesho tilmaamo dheeraad ah oo ku saabsan insuliinta iyo/ama maareynta sonkorta dhiigga.

Sii-wad Cuntada Cabbitaanka Cad ilaa 3 saacadood ka hor habraacaaga, ka-dibna jooji cabbidda. Iska ilaali kafeega, dareeraha guduudan, waxyaabaha caanaha laga sameeyo, borotiinka la ruxo, cabbitaanka khamriga, iyo tubaakada la ruugo iyo mukhaadaraadka sharci-darada ah. Isticmaalka kuwani waxaa ay keeni doonaan in habraacaaga la baajiyo.

- **Ka hor 3 saacadood:**
 - JOOJI qaadasha dareere oo dhan.
 - Afka waxba haka qaadanin inta lagu guda jiro waqtigan.

Waxyaabahan soo socda la imow goobta habraacaaga:

- Keen oo horey u soo qaado foomka Taariikhda Caafimaadka oo buuxa ee ku jira xirmadan maalinta ballantaada.
- Kaarka Caymiska / Aqoonsi Sawir leh
- Liiska Daawooyinka Hadda aa qaadato oo ay ku jiraan daawooyinka la iska soo gato ee aan takhtarka dadka u qorin iyo faytamiinnada dheeraadka ah
- La imow qalabkaaga badbaadada ee neef-ahaanta daawada loogu dhuuqo haddii aad hadda mid isticmaashid oo neefta isaga xakameysid
- Keen oo la imow qalabka muraayadaha aragga ee indhaha lagu dhejiyo maadaama lagu wayddiin doono in aad iska bixiso muraayadaha ka hor inta uusan habraacaaga bilaaban
- Awaamiirta Horumarsan: Haddii aad qabtid Amar Horumarsan, fadlan xilliga ballantaada baaritaanka guda-ku-jirka la imow nuqulka Amarkaaga Horumarsan. Awaamiirta Horumarsan laguma sharfo xarumaha MNGI, haddii ay dhacdo xaalad nafta halis gelinaysa, tallaabooyin lagu taageerayo nolosha ayaa lagu sameyn doonaa xaalad kasta bukaanadeennana waxaanna loo qaadi doonaa xarun daryeel heer sare ah leh (sida, cusbitaalka). Haddii ay dhacdo dhacdada aan la filaynin oo aadna u baahato wareejin degdeg ah in laguugu wareejiyo xarun daryeel oo heer sare ah, Amarkaaga Horumarsan waa in uu kuu wehliyo xaruntaasi.

SHARAXAADDA BAARITAANKA GUDA-KU-JIRKA KORE

Waa maxay baaritaanka guda-ku-jirka kore?

Baaritaanka guda-ku-jirka kore waa habraac la sameeyo si loo qiimeeyo astaamaha xanuunka caloosha kore, dhiig-baxa, lalabada, mataga ama dhibaataada lagala kulmo wax liqidda. Inta lagu guda jirro habraaca, takhtar ayaa baaraya dahaarka hungurigaaga, calooshaada iyo qaybta koowaad ee mindhiciir yarahaaga iyada oo la adeegsanayo tuubo jilicsan oo loo yaqaano qalabka baarista guda-ku-jirka (endoscope). Haddii soo baxyo ama waxyaabo kale oo aan caadi ahayn la helo, takhtarka waxaa laga yaabaa in uu soosaaro nudaha aan caadi ahayn si uu ugu sameeyo baaritaan dheeraad ah, ama dheecaanka jirka laga qaado oo lagu oggaado cudurka (biopsy) Haddii aad dhibaato ku qabtid wax liqidda, waxaa suuragal ah in goobta la ballaariyo inta lagu guda jiro habraaca.

Maxaa dhacaya inta lagu guda jirro baaritaanka guda-ku-jirka kore?

Qorshee in aad ku qaadato ilaa 2 saacadood xarunta lagu eego guda-ku-jirka maalinta habraacaaga. Habraaca laftiisa waxaa uu qaataa ku dhowaad 15 daqiiqo in lagu dhammeeyo.

Ka hor habraaca:

Taariikhda caafimaadkaaga ayaa waxaa dib-u-eegis kuugula sameynayo kooxdaada daryeelka caafimaad oo ay ka mid yihiin kalkaaliyahaaga caafimaad, takhtarkaaga caloosha iyo mindhiciirada iyo bixiyaha adeegga suuxinta. Tuubo marta xiddidada ayaa lagu gelin doonaa

Inta lagu guda jiro habraaca:

Inta lagu guda jiro habraaca, bixiyaha adeegga suuxinta waxaa uu ku siin doonaa daawooyin ka dibna waxaa uu la socon doonaa calaamadaha muhiimka ah ee ah hannaanka ee loo yaqaano Daryeelka Suuxinta ee La Kormeero (MAC). Iyada oo bukaannada badankooda ay seexdaan inta uu socdo habraaca oo dhan, qaarkood waa kuwo soo-jeeda oo ogaal-leh. Takhtarka suuxinta iyo/ama kalkaaliyaha diiwaangashan ee aqoonta u leh suuxinta (CRNA) waxaa ay gacan ka geysan doonaan go'aaminta noocyada habboon ee daawada ay tahay in la isticmaalo inta lagu guda jiro habraaca si ay kaaga dhigto qof ammaan ah oo raaxo dareemaya.

Maxaa dhacaya ka-dib habraaca?

Takhtar ayaa kaala hadli doona natiijooyinka bilowga ah ee habraacaaga waxaa uuna u diyaarin doonaa warbixin buuxda bixiyaha daryeelka caafimaad ee kuu soo diray baaritaanka guda-ku-jirka kore. Waxaad yeelan kartaa xoogaa calool maroojis ah ama dibirro ka-dib habraaca oo ah wax caadi ah. Dhuuntaada waxaa ay muddo gaaban dareemi doontaa xanuun. Muunado nude ama buro kasta ee la soo saaro inta lagu guda jiro habraaca waxaa shaybaar loogu dirayaa in lagu soo qiimeeyo. Waxay qaadan kartaa 5-7 maalmood shaqo si laguugu soo sheego natiijooyinka midaas oo laguugu soo diri doono boostada ama Bogga internetka Bukaanka.

Waxaad dib-u-bilaabi kartaa inta badan hawlahaaga caadiga ah maalinta ku xigta habraaca. Hase-yeeshee, daawooyinka lagu siiyay xilliga habraaca waxaa ay kaa mamnuucayaan in aad gaari wadid maalinta inteeda kale. Waxaad sii wadan doontaa cunooyinkaaga caadiga ah, laakiin khamri waa in laga fogaado ilaa maalinta xigta kadib habraaca.

Ma jiraan dhibaatooyin suurtagal ah oo ka dhalan kara baaritaanka guda-ku-jirka kore?

Inkasta oo dhibaatooyinka halista ah ay yihiin kuwo dhif ah, haddana habraac caafimaad kasta waxaa uu yeelan karaa khatarro. Khataraha ka dhalan kara habraaca waxaa ka mid ah daloolin, ama dillaac gaari kara dahaarka caloosha ama hunguriga, dhiigbaxa goobta dheecaanka jirka laga qaaday, falcelinta daawooyinka, dhibaatooyinka wadnaha iyo sambabada, iyo dhaawacyada ilkaha ama indhaha.